

Maxay tahay aabbanimada?

Go'aan gaarista sharciga ah ee aabbaha u dhasahay cunuga.

Haddii waalidiinta cunuga aysan isqabin marka uu cunuga dhalanayey, cunugaasi ma haysto aabe sharci ah. Waalidiinta waxaa looga baahan yahay inay aabonimo u sameeyaan.

Maxaan u sameynayaa aabbanimada?

Sameynta aabbanimada waxay siin kartaa taakuleyn dhaqaale oo niyadeed, ijtimaaci u ah cunugaaga.

Sidee buu aabbaha dhiig ahaan u wadaaga cunuga u noqdaa aabbaha sharciga ah?

Sida ugu fudud waa in la buuxiyo Warqada Dhaarta ee Qirashada Aabbanimada (JFS 07038).

Waa maxay Warqada Dhaarta ee Qirashada Aabbanimada?

Waa dokumenti sharci ah oo oggolaada waalidiinta aan isguursan ku magacaabaan aabbah dhiiga wadaaga una sameeyaan aabbanimada uu yeesho cunugooda. Laba waalidba waxay sixiixayaan warqada dhaarta. Buuxinta warqada dhaarta waa ikhtiyaari.



Maxaa dhacaya haddii aan la hubin kan ah aabbaha dhiiga wadaaga?

Keliya waalidka dhiiga wadaaga ayaa sixiixi kara warqada dhaarta. Haddaadan hubin kan ah aabbaha dhiiga wadaaga, ha sixiixin. Sameynta aabbanimada iyadoo loo marayo baarista DNA ayaa laga yaaba inay tahay xulasho kuu wanaagsan. Wixii macluumaad dheeri ah la xiriir hay'ada dhaqangelinta masaruufka cunuga (CSEA).

YAANAN buuxineyn waqada dhaarta?

- Hooyo la qabo
- Hooyo la furay 300 maalmood gudahood ee dhalashada cunuga
- Hooyo si sharci u kala tageen seygeeda

Waxaa jira duruufo gaar ah oo ka hortageysa qofka inuu isticmaalo warqada dhaarta si uu u sameeyo aabbanimo. Haddii aadan hubin, fadlan la xiriir CSEA deegaankaaga.

Xagee baan ka helaa warqadda dhaarta?

- Markaad joogto oo uu cunugaaga dhasho
- Markaad joogto xafiiska diiwaangelinta deegaanka (waxaa kaloo loogu yeeraa Tirokoobka muhiimka uah Noloshaha ama Waaxda Caafimaadka) kadib markuu cunugaagu dhasho
- Marka aad joogto CSEA deegaanka oo uu cunugaagu dhasho

Maxaan ku sameeyaa warqada dhaarta si aan uga dhigo mid rasmi ah?

Labada waalidba waa inay sixiixaan warqada dhaarta ayadoo xaadir ay tahay notaayada dadweynaha oo warqada dhaarta la notaayogareeyo, laakin ma aha inay sixiixaan isla markaas.

Waalid kasta waxaa looga baahan doonaa masawirka Teesaraha (sida shatiga darawalnimada) iyo lambarka Social Security.

Waa ay fudud yihiin in la raaco tilmaamaha ku qoran warqada dhaarta.

Notaayooyinka waa bilaash markaad isbitaalada, diiwaanhayaha deegaanka iyo CSEA-da deegaanka la joogo.

Miyey ilmaha yaryar sixiixi karaan warqada dhaarta?

Haa, ilmaha yaryar waa ay sixiixi karaan warqada dhaarta.

Miyuu qof aan muwaadin Mareykan aheyn sixiixi karaa warqada dhaarta?

Haa, Looma fiirinayo muwaadinimada waalidka, hadduu cunug ku dhasho dalka Mareykanka, aabonimo waa la sameyn karaa. Warqada dhaarta looma isticmaalo in lagu dabagalo muwaadiniinta aan Mareykanka aheyn.

Goormay warqada dhaarta kama dabeyns tahay?

Warqada dhaarta waa kama dambeys 60 casho kadib taariikhdii sixiixa ugu dambeeyey, inkastoo cidna soo qaadi karin arinta aabonimo iyo warqada dhaarta oo sax ah loo saxiixay, la nootaayeyey oo la geliyey faylka Diwaanka Dhexe ee Aabbanimo.

Ka waran haddaan go'aankeyga bedelo kadib anigoo sixiixay warqada dhaarta?

Hooyada ama ninka sixiixay warqada dhaarta waxa uu joojin karaa howsha markasta inta lagu gudo jiro 60 casho oo sixiixa iyadoo lala xiriirayo CSEA deegaankaaga. Mudo 60 casho kadibna, waa inaad la xiriirtaa xeer-ilaaliyaha.

Hadduu ninka sixiixay warqada dhaarta, miyaa looga baahan yahay inuu bixiyo masaruufka cunuga?

Iyadey ku xiran tahay. Labada waalid masuuliyad ayaa ka saaran inay masaruufaan cunugooda. Haddii uu cunuga helay macaashyada qaar, aabbaha waxaa looga baahan karaa inuu bixiyo masaruufka cunuga. La soo xiriir CSEA deegaanka si aad ugala hadasho xaaladaada inaad hesho jawaabo qeexan.

Sidee xanaanada iyo booqashada go'aan looga gaaraa?

Haddii hooyada aan la qabin wakhtigii uu cunuga dhalanayey, waxay durbadiiba haysataa xanaaneyn sharci ah oo uu cunugeeda leeyahay. Arimaha xanaaneynta iyo booqashada oo idil waa in looga hadlaa maxkamadaha.



Macaashka Iman kara ee Sameynta Aabbanimada

Aqoonsiga

- Cunuga waxa uu xiriir la yeelan doonaa labada waalid reerka ballaaran.
- Magaca aabbaha waxa uu ka muuqan doonaa shahaadada dhalashada cunuga.

Xanaanada iyo Booqashada

- Waalidka aan xanaaneeyn (waalidka cunug ama la noo) wuxuu codsan karaa boqasho iyo xanaaneyn.

Dhaqaale

- Labada waalidba way wada qeybsanayaan masuuliyadaha dhaqaalaha.
- Cunuga waxa uu xaq u yeelan karaa kaalmada dowlada u fidiso dadka dhaqaalaha soo galin, macaashka halyeeyga uu helo, macaashka dhaxalka ama masaruufka cunuga.

Caafimaadka

- Cunuga waxa uu helayaa taariikhda caafimaadka qoyska.
- Go'aano badan oo la sheegay ayaa la sameyn karaa hadba iyadoo loo eegayo caymiska cunuga uu leeyahay.



2012.000072.01

Kor u qaadista Aabbanimada Barnaamijka

Si aad wax badan uga barato:

Sameynta aabbanimada

Su'aalaha inta badan la isweydiyo

**Macluumaad muhiimka ah ee lagala xiriiro
Haddii warqada dhaarta ay sy kula quman tahay**

Fadlan booqo:

www.oh-paternity.com

ama wac:

1-888-810-OHIO (6446)



Ohio | Department of
Job and Family Services

Mike DeWine, Gudoomiyaha Gobolka
Gobalka Ohio
Kimberly Hall, Agaasime

Waaxda Ohio ee Shaqada iyo Adeegyada Qoyska
Xafiiska Taageerada caruurta
JFS 08079-SOM (Tixraac. 4/2019)

Hay'addani waa bixiye fursad iyo shaqo loo
siman yahay.

Ohio | Department of
Job and Family Services



**"Maxaa Kala
duwanaansho
ah ayuu Aabbe
sameeyaa!"**

**Macluumaadka ku saabsan
Barnaamijka Kor u qaadista
aabonimo iyo Warqada dhaarta ee
Qirashada aabonimo.**